## Way fiicantahay in la ogaado

# HPV

Folkhälsomyndigheten

**HPV (human papillomavirus)** waa fayras aad loo kala qaado oo mustaqbalka horseedi kara noocyo kala duwan oo kansar ah. Tallaalka HPV wuxuu ka ilaaliyaa kansarka uu keeno fayrasku. Dhammaan carruurta waxaa la siiyaa talaal bilaash ah oo ay bixiso kalkaalisada dugsiga ee fasalka 5.

### HPV wuxuu u horseedi karaa kansar

Waxaa jira noocyo badan oo kala duwan oo HPV ah. Noocyada kala duwanaan dhamaantood ma keenaan jirro halis ah, laakiin qaar badan oo ka mid ah waxay keeni karaan kansar nolosha waqtiga dambe. Dadka intiisa badan way qaadaan HPV mar ka mid ah noloshooda, laakiin qaar badan ayaan wax kama ogayn sababta oo ah lama dareemo ama lama arko.

HPV waxa uu fidi karaa marka xuubabka dhacaanku is taabtaan midba midka kale, tusaale ahaan marka galmo la samaynayo. Inta badan, infekshanku iskii ayuu u bogsadaa, laakiin mararka qaarkood waxa uu noqdaa mid waara. Tani waxay kordhisaa khatarta ah inuu ku dhaco kansarka nolosha dambe, tusaale ahaan cunaha, afka ilmo-galeenka, xubnaha taranka (siilk, qeybaha sare xabunka taranka ama guska) ama daloolka dabada.

Sannad kasta, qiyaastii 1,550 qof oo Iswiidhan ah ayaa saameeyaa nooc ka mid ah kansarka uu keeno HPV.

### Tallaalku wuxuu ilaaliyaa jinsiga midkuu doono ha ahaadee

Tallaalka HPV waxa uu ka ilaaliyaa badi noocyada fayraska ee keeni kara kansar. Dhammaan carruurta waxaa lagu siiyaa tallaalka dugsiga sababtoo ah ilaalinta ugu fiican ayaa la abuuray markaas.

### Tallaalku wuxuu bixiyaa difaac wanaagsan

Tallaalka HPV waxaa la bixiyaa adduunka oo dhan si looga ilaaliyo kansarka. Daraasaduhu waxay muujiyeen in tallaalku bixiyo difaac wanaagsan oo ammaan ah. Dhammaan tallaallada ka dhanka waxaa lagu diiwaan gelinayaa diiwaanka qaranka ee tallaalka. Sidan, ka hortagga kansarka ayaa lagula socon karaa muddada fog.

### Ma dooneysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato?

Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato tallaalka, fadlan la xidhiidh kalkaalisada dugsiga ilmahaaga.

### SIDAN AYUU TALLAALKU U DHACAA

Kalkaalisada dugsigu waxay ku siinaysaa tallaalka waana irbad lagu durayo gacanta qeybta sare. Tallaalka waxa la bixiyaa laba qiyaasood oo leh ugu yaraan lix bilood inta u dhaxaysa qiyaasaha. Haddii ilmuhu da'diisu tahay 15 jir ama ka weyn wakhtiga qiyaasta hore, saddex qiyaas ayaa loo baahan yahay wadar ahaan.

**Tallaalka ka hor**
La hadal kalkaalisada dugsiga haddii aad wax su'aalo ah ama walaac ah qabtid kahor tallaalka.

**Tallaalka kadib**
Ka dib marka cirbadda lagu mudo waa wax iska caadi ah in qofka garabka hoostiisa ay yara damqato, casaato, bararto ama ay cuncunto. Dadka qaar waxaa ku dhici kara qandho waqti gaaban hayneysa iyo madax xanuun, waxayna dareemi karaan xanuunsanaan guud. Xasaasiyadaha ka dhasha tallaalku aad uma badna. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama haddii ilmahaagu uu dareemayo xanuun ka dib tallaalka, fadlan la xiriir kalkaalisada dugsiga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka.

SKYDD FÖR LIVET

# Barnaamijka tallaalka ee iswiidhan

**Carruurta oo dhan** waxaa lagu casuumaa difaaca ka hortagga dhowr cudur oo halis ah iyadoo loo marayo talaalada dhanka XCC. Tallaalyadan waxaa marka hore lagu siiyaa rugta daryeel-caafimaadka carruurta ka dibna iskoolka.

### MARKA ILMAHAAGU YAHAY

- **Marka uu jiro lix toddobaad** , tallaalka ugu horreeya ayaa la bixiyaa si looga hortago caabuqa rotavirus.
- Tallaalka labaad ee ka hortagga caabuqa rotavirus waxa la bixiyaa-saddex bilood . Waxa kale oo hadda laga tallaalay toddoba cudur oo kale: gawracatada, teetanada, xiiqdheerta, dabaysha, Hib, pneumococcal iyo cagaarshow B.
- **Shan bilood ka dib,** waa waqtigii lagu celin lahaa tallaalada uu ilmuhu helay booqashadii ugu dambeysay, markii uu jiray saddex bilood.
- **Marka uu jiro hal sano,** cunuga waxaa laga tallaalaa mar saddexaad cudurro la mid ah marka uu jiro saddex iyo shan bilood, marka laga reebo caabuqa rotavirus.
- **Marka uu jiro hal sano iyo bar,waxaa la bixiyaa** tallaalka jadeecada, qaamo-qashiirta iyocascasaanka maqaarka.
- **Marka uu shan sano jiro,** tallaalka ugu dambeeya waxaa lagu bixiyaa BVC, kaas oo ah qiyaas xoojin ah oo ka dhan ah gawracatada, teetanada, xiiqdheertaiyo dabaysha.

### MARKA ILMAHAAGU AADO DUGSIGA

- **Fasalada 1-2** waxay helayaan tallaalka labaad ee jadeecada, qaamo-qashiirta iyojadeecada.
- **Fasalka 5,** dhammaan carruurta waxay helayaan laba tallaal oo ka dhan ah papillomavirus, HPV, si looga hortago kansarka.
- **Fasalada 8-9** waxay helayaan tallaalka ugu dambeeya ee gowracatada, teetanada iyo xiiqdheerta.

### TALAALKA FAAYRASKA SHUBANKA XUN WUXUU KA TIRSAN YAHAY BARNAAMIJKA TALAALKA EE ISWIIDHAN.

Halkan hoose waxaad ka arkaysaa talaalada la siiyo dhammaan carruurta joogta Iswiidhan, si looga hortaggo cudurada halista ah.
si looga hortago cudurrada halista ah.

